



Su'aallaha Soo Noqnoqda ee Inta badan la Isweydiyo

1. Waa maxay Bogga Adeeg-Bixinta Cusub ee Magaalada Greeley?

Magaalada Greeley waxa ay ku faraxsan tahay in ay daaha ka qaado Bogga cusub ee Adeeg-Bixinta, kaas oo beddeli doona sistamka adeega lacag bixinta biyaha ee hore iyo barnaamijka WaterSmart.

2. Waa maxay sababta ay Greeley ugu guureyso sistamka adeeg-bixinta cusub?

Bogga adeeg bixinta cusub ee Greeley ayaa fududeynaya oo hal meel iskugu kenaya ku bixinta lacagaha hab onlayn ah iyo maareynta isticmaalka biyahaaga. Macmiisha hadda kadib loogama baahno in ay soo galaan labo sistam kala duwan si ay xogtooda u helaan.

Bogga cusub ee Adeeg-Bixinta Greeley ayaa qeyb ka ah dadaalka ay magaaladu ugu jirto sare u qaadista adeegyada magaalada iyo in ay siiso macaamilaad wanaagsan macmiisha.

3. Goorme ayuu bogga cusub ee Adeeg-Bixinta Greeley furmaya?

Bogga cusub ee Adeeg-Bixinta Greeley waxa uu furmaya Nofembar 18, 2025. Sistamkii hore ee adeeg-bixinta lacagta iyo WaterSmart hadda wixii ka dambeeyo lama heli karo.

4. Sidee ayuu uga duwan yahay bogga cusub ee Adeeg-Bixinta biilasha sistamkii hore ee lacag bixinta?

Bogga cusub ee Adeeg-Bixinta Greeley waxa uu awood kuu siinaya in aad hal meel ka wada hesho adeegyada lacagaha biyaha iyo xogta isticmaalka biyaha. Hadda kadib uma baahnid in aad labo meel kala duwan kasoo gasho akoonadaada si aad xogtan u hesho. Sistamka cusub waxa uu u fudud yahay inay adeegsadaan macmiisha sidoo kale waxa uu faa'idooyin badan u leeyahay macmiisha Greeley.

5. Waa maxay faa'idooyinka Bogga cusub ee Adeeg-Bixinta Greeley?

Bogga cusub ee Adeeg-Bixinta Greeley waa ay fududahay in la isticmaalo isla markaana waxa uu bixinaya faa'iidooyin ka badan sistamka hadda jira sida inaad:

- Isla markiiba ku bixiso lacagta biyaha si onlayn ah.
- Samaysan karto lacag bixin otomatig ah si aysan lacagba kugu daahin.

- Eegtid isticmaalkaaga biyaha iyo isbeddelada. Sistamka ayaa ku ogeysiin karo xitaa marki ay biyaha daadanayaan!
- Hesho xogta keydka biyaha iyo baqshiishyada.

Ka hel intaan oo dhan iyo wax kabadan hal meel!

6. Wali ma awoodi doona in aan isticmaalo WaterSmart?

Bogga WaterSmart hadda wixii ka dambeeyo lama heli karo. Warbixinta isticmaalkaaga biyaha iyo agabka la xiriiro ayaa hadda ka heli kartaa Bogga Adeeg-Bixinta Greeley.

7. Goorme ayaan samaysan karaa akoon cusub?

Waxaad sameysan kartaa akoonkaaga cusub isla markii aad hesho warqada biilkaaga leh nambarka akoonkaaga CUSUB (laguu soo diri doono kadib Nofembar 18, 2025). Taa beddelkeed, waxaad iska diwaan gelin kartaa hadda adigoo isticmaalaya qaybta 'Find My New Account Number' ee saaran bogga hore La iska diiwaangeliyo.

8. Sidee u sameysan karaa akoonkayga cusub?

Waxaad raacdaa tilmaamaha is-diiwaangelinta ee ku xusan qaybta sare ee boggan si aad u sameysato akoonkaaga cusub. Macluumaadka wax ku oolka ah ayaad ku heli kartaa luuqado badan, oo ay ku jirto tilmaamaha tallaabayinka oo muuqaal ah, iyo taagerada taleefan.

Hubi in aad isla markiiba iska diwaan galiso si aad u hubiso sii wadida isticmaalka akoonadaada biyaha iyo bulaacada.

9. Maxaa dhacayo haddii aanan sameysan akoon cusub?

Haddii aad hadda onlayn ku bixiso lacagta ama aad tahay macmiil si otomatig ah u bixiyo, akoonkaga waxa uu ku noqon doona lacag bixinta warqada ilaa aad ka sameysato akoon cusub bogga Adeeg-Bixinta Greeley.

Haddii aad horay u isticmaaleysay lacag bixinta warqada, waxba isma beddeli doonaan — waxaad biilashaada ku sii heli doonta boostada.

10. Si onlayn ah maku bixin karaa anigoo isticmaaleynin lacag bixinta otomaatiga ah?

Waxaad halmar lacag bixin ah ku sameyn kartaa onlayn adigoo adeegsanaya Bogga adeeg-bixinta cusub ee Greeley adigoo isticmaaleynin lacag bixinta otomaatiga ah.

11. Wali lacag maku bixin karaa sistamkii hore ee adeega-lacag bixinta?

Sistamkii hore ee adeegga lacag bixinta bataatan ma shaqaynayo, dhamaan lacag bixinta onlaynka waxaa lagu sameyn doona Bogga cusub ee Adeeg-Bixinta biilasha ee Greeley.

12. Sidee u heli karaa caawinaad ku aadan sameysashada akoonkayga cusub? Caawinaad malagu heli karaa luuqadaha kale?

Macluumaad kala duwan ayaad ka heli kartaa oo kaa caawinaya in aad akoon cusub sameysato. Tani waxaa kamid ah habraac tallaabooyinka, muuqaalo sida loo sameyo, qadka taleefanka laga caawiyo macmiisha oo luuqado badan ah.

13. Maxaad ugu baahan tahay xogteyda qaaska ah?

Xogta qaaska kaliya ee loo baahan yahay si loo sameyo akoonkaaga waa magacaaga iyo ciwaankaga. Tani waxa ay naga caawineysaa in leysku xiro akoonkaaga isla markaana la hubiyo in aad bixineyso lacagaha adeega biyaha ee saxda ah.

14. Xogteyda mid amaan ah ma ahaan doontaa?

Bogga Adeeg-Bixinta Greeley waxay leedahay qayb casriyeysan oo sugta amniga oo loogu talagalay in lagu ilaaliyo xogtaada shaqsiyadeed ee qaaska ah. Warbixintaada waxaa dhowraya sharciga wadanka mana lala wadaagi doono hayadaha dowliga ama qolo saddexaad.

15. Maku bixin karaa biilkayga noocyo lacag bixin oo kala duwan?

Waxaad ku xiran kartaa noocyo badan oo lacag bixin ah (kaararka amaahda/kuwa caadiga ah ee bangiyada, koontoyinka bangiga) ee Warqada Qaansheegta Onlaynka ah. Hase ahaate, waxaad u dooran kartaa hal lacag bixin inaad "ku dayso", taas oo loo isticmaali doono lacagaha otomaatiga ah. Kaliya hal lacag bixin ayaa la isticmaali karaa halki mar aad lacag direyso.

16. Lacagta taleefanka maku bixin karaa?

Waxaad ku bixin kartaa qadka teleefanka bilaa faragelin adigoo isticmaalaya sistamkeena Codka Lagula Macaamili karo (IVR) ee isla markaana la heli karo 24/7 toddobaadkii. Si aad ugu bixiso lacagta biyaha qab taleefoneed waxaad wacdaa 855-679-1593 waxaadna sii diyaarsata akoon nambarkaaga.

17. Akoono kala duwan lacagta maka bixin karaa?

Ka milkiilaha kowaad akoonka, waxaad ku xiri kartaa koontoyin badan si ay kugu fududaato in aad lacagta ku bixiso halki mar aad soo gasho. Tani waxa ay u fududeyneysa akoonada maamula kuwa kale sida milkiilayaasha, wakiilada guri, iyo HOAs.

Soo gal tag qeybta 'Profile' kadib dooro 'Account' si aad uga sii dorato badhanka 'Add an account'. Waxaad u baahan doonta nambarka akoonka cusub iyo lacagtii ugu dambeysay ee

adeega biyaha akoon kasta aad rabto in aad ku darto. Xad malahan akoonada aad ku xiri karto halkii akoon.

18. Miyaad ku dari karaa maamulka guriga ama magaca kireystaha akoonka?

Milkiilaha akoonka waxa uu ku dari karaa magaca maamulaha guriga ama kireystaha akoonka Adeeg-Bixinta Greeley. Soo gal oo dooro qeybta 'Services' kasii dooro 'Forms' kadibna 'Account Change.' Waxaad buuxisa foomka oo kusoo dir Adeeg-Bixinta si loo aqbalo.